



## MIC-KEY® ANVÄNDNING OCH SKÖTSEL I HEMMET

### GURI KU ISTICMAALIDDA IYO XANNAANADA MIK-KEY® GASTROSTOMIPOINT

**1**

***Sidaan samee hal mar  
maalintii:***

1. Dhaq hal mar maalintii maqaarka u dhow daloolka taaso noqoneysa qayb ka mid'ah nadaafadda guud ee subaxdii ama fiidkii la sameeyo, kaddibna engeji maqaarka u dhow daloolka.
2. Qaadashada cunnada ka hor iyo ka dibba ku naadiifa mar-walba dhuumaha wax isku xirriiriya biyo dhan 10-20 ml.
3. Marka aad sameyneysid nadaafadda guud ee subaxdii ama fiidkii ku wareeji Mic-Key®-ga daloolka hal wareeg.

**2**

***Sidaan samee hal mar  
toddobaadkii:***

Isniin walba, tusaale ahaan, fiiri oo beddel mugga biyaha ku jira kolayga.

**3**

***Sidaan samee bil-dhaaf:***

U arag una isticmaal Mic-Key® sida qalab cunno. Sidaas-darteed ku isticmaal, qiyaas ahaan, bil-dhaaf walba Mic-Key® cusub, kaasoo markaas midibkiisa doorsoomo iyo marinka vaalvolha oo daciifa.